<<Insert Trust Header>>

# XAASHIDA XOGTA KA QAYBQAATAHA (Ka hooseeya 12)

**AQOONSIGA IRAS: 339327**

## Go'aaminta suurtagalnimada ah in carruurta iyo dhallinyarada si aan kala sooc lahayn loogu dooro farsamooyinka muunad qaadista kaadida ee jirka wax lagu duro iyo kuwa aan u baahnayn in jirka wax lagu duro
## Daraasadda FROG



***Waan fahamsanahay inaad dareemayso caafimaad darro waana sababta aad isbitaalka u timid.***

Waxaan jeclaan lahayn inaan ku waydiisano inaad naga caawiso daraasaddeena cilmi-baarista.

### Waa maxay daraasad cilmi-baaris?

Daraasad cilmi-baaris ah waa waxa aad sameyso marka aad rabto inaad wax ka barato shay ama aad rabto inaad ogaato wax cusub.

### Waa maxay sababta loo sameeynayo cilmi-baaristan?

Waxaan sameyneynaa daraasaddan (loo yaqaano FROG) si aan u ogaanno habka ugu wanaagsan ee dhakhaatiirtu u qaadi karaan muunada kaadida (wee).

### Waa maxay sababta dhakhaatiirtu ugu baahan yihiin inay ururiyaan kaadida?

Dhakhaatiirtu waxay mararka qaarkood u baahan yihiin inay ururiyaan muunada kaadida carruurta si ay u ogaadaan sababta ay u xanuunsan yihiin.

Haddii baaritaanka kaadida uu muujiyo in ilmuhu xanuunsan yahay markaas dhakhtarku wuxuu siin karaa daawo si ay u dareemaan caafimaad. Haddii baaritaanka kaadida aanu muujin in ilmuhu xanuunsan yahay markaas wax daawo ah uma baahna.



Ilmo dareemaya caafimaad daro

### Sidee Dhakhaatiirtu u uruuriyaan muunada kaadida?


**Waxaa jira 3 siyaabood oo kala duwan oo loo uruuriyo muunada kaadida**

1



Qof wayn kaadida haku shubo weel inta aad kaadinayso

2



Kaadida ka soo saar jirkaaga

iyada oo la soo marinayo tuubo jilicsan oo caag ah

oo la gelinayo xubinta jirkaaga ee kaadida ka timaado

3





Kaadida ka soo saar jirkaaga

iyadoo la isticmaalayo irbad

lagu durayo maqaarka calooshaada,

si la mid ah baaritaanka dhiigga.

<<Insert Trust Header>>

## Waxaan u baahanahay caawimadaada ah inaad ka jawaabto su'aasha:



Waa maxay habka ugu wanaagsan ee loo qaado muunada kaadida?

## Waxaad na caawin kartaa adigoo:

Gabar la yaaban waxa ay tahay jawaabta su'aasha



Carruur fadhisa miis iyagoo haysta qalimaanta midabka iyo warqado oo la hadlaya dad waaweyn

- **noo sheegaya sida aad dareemayso ka dib marka lagaa qaado muunaddaada kaadida**

  **Iyo/Ama**

- **Oggolaanaya inaad cilmi-baare kala hadasho waxa aad ka aaminsan tahay daraasadda FROG**

  **Iyo/Ama**



- **Oggolaanaya in kombuyuutar uu kuu dooro**

  **1 ka mid ah 3-daan hab:**

  **Weel, tuubo caag ah, ama irbad**

  **si jirkaaga looga soo qaado qaar ka mid ah kaadada.**

<<Insert Trust Header>>

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan weydii Hooyadaa, Aabbahaa ama qofka ku daryeela, ama mid ka mid ah kalkaaliyayaasha ama dhakhaatiirta.



Wiil hadlaya



Gabar hadlaysa

Waad ku mahadsan tahay akhrinta

**Haddii aadan rabin inaad sameyso mid ka mid ah waxyaabahan kaliya noo sheeg**

**Maya, mahadsanid!**

Sawirada waxaa si bilaash ah u bixiyay [www.freepik.com](http://www.freepik.com); [www.googledocs.com](http://www.googledocs.com)